


Kulanka Bulshada Glendale

Juun 17, 2026





Ajandaha Kulanka Maanta

- Soo dhoweyn iyo isbarasho
- Jiheynta mashruuca ee la doortay
- Qalabka HUD & maalgelinta guryaha la awoodi karo; Ballanqaadyada MPHA
- Dib-u-dejin
- Tallaabooyinka xiga
- Fadhiyo gaar ah oo lagu faahfaahinayo:
 - Qorshaha goobta
 - Naqshadaha guryaha
 - Heshiiska Dib-u-dejinta – Xuquuqda & Dammaanadaha Deggenayaasha
 - Qalabka HUD iyo Guryaha La Awoodi Karo

Xeerarka Kulanka

Waxaan rabnaa inaan maanta idin maqalno. Si qof walba uu fursad ugu helo ka qaybgalka, fadlan raaca xeerarkan:

- Isula dhaqma si ixtiraam leh.
- Qof kasta waa inuu u dhaqmaa si:
 - Uusan u carqaladeyn habsami u socodka kulanka.
 - Uusan u hor istaagin awoodda dadka kale ee daawashada ama ka qaybgalka kulanka.
 - Uusan u abuurin cabsi ama dareen hanjabaad iyo caga-jugleyn.
- Sug inta lagu yeerayo ka hor intaadan hadlin.
- Si qof walba fursad u helo, waxaa laga yaabaa in hadalka lagu xaddido 3 daqiiqo.

Waxaan Daraasad Ku Samaynay

Ikhtiyaarka 1: Dayactir + Ballaarin



Ikhtiyaarka 2: Dayactir + Ballaarin + Dhismo Cusub



Ikhtiyaarka 3: Dhismo Cusub



Jihada Mashruuca

Dhismo Cusub

- Guri kasta oo jira waxaa lagu beddelayaa mid cusub + 100 kaloo guryo cusub ah
- Qaybinta Guud ee Guryaha
 - 1 qol jiif: 39
 - 2 qol jiif : 98
 - 3 qol jiif : 103
 - 4 qol jiif : 32
 - 5 qol jiif : 12
- Saddex Nooc oo Dhismo ah
 - Guryo isku xiran
 - Dhismayaal 3-dabaq ah (Walk-up) oo dhammaan guryuhu leeyihiin albaab toos uga baxa bannaanka
 - Dhismayaal 4-dabaq ah oo leh wiish
- Ku dhowaad 120 guri oo leh albaab iyo marin toos ah oo bannaanka ah
- Ku dhowaad 300 meelood oo baarkin
- Goobo cusub oo adeegyo gudaha iyo bannaanka ah oo loogu talagalay deggenyaasha
- Adeegyada PICA/Head Start iyo Food Shelf way sii jiri doonaan



Jihada Mashruuca

- Waxay si fiican uga jawaabtaa baahiyaha kala duwan ee bulshada iyadoo bixineysa noocyo kala duwan oo dhismayaal iyo guryo ah.
 - Waxay kordhisaa helitaanka dadka naafada ah iyo fursadaha nolol dabaq keliya ah.
- Waxay bixisaa horumarinta ugu badan ee ku habboonaanta guryaha.
- Waxay si wax ku ool ah u yareyn kartaa gubinta qaylada u dhexeysa guryaha.
- Waxay kordhinaysaa baarkin iyo adeegyo gudaha iyo bannaanka ah.
- Waxay daboolaysaa baahiyaha hadda jira iyo kuwa mustaqbalka ee deggenyaasha Glendale iyadoo sidoo kale u oggolaanaysa MPHA inay adeegto qoysas dheeraad ah.



Guryo Isku Xiran

- 63 guri oo u dhexeeya 1 ilaa 5 qol jiif
- Waxay ka kooban yihiin hal dabaq ilaa laba dabaq
- Waxay leeyihiin albaab hore iyo albaab dambe
- Baarkinkoodu waa goobo banaanka ah inta badan



* Sawirrada la soo bandhigay waa tusaale keliya.
Naqshadda dhismayaashu way is beddeli kartaa inta
mashruucu socdo.

Dhismayaal 3-Dabaq ah

- 5 dhisme, midkiiba 8 guri, wadar ahaan 40 guri una dhexeeya 1 ilaa 5 qol jiif
- Guri kasta wuxuu leeyahay albaab u gaar ah iyo marin toos uga baxa bannaanka, iyo meel bannaan oo u gaar ah.
- Inta badan baarkinku wuxuu ahaan doonaa goobo bannaanka ah.

* Sawirrada la soo bandhigay waa tusaale keliya. Naqshadda dhismayaashu way is beddeli kartaa inta mashruucu socdo.



Dhismayaal 4-Dabaq oo Wiish Leh

- 4 dhisme, mid kasta oo leh wax ka yar 50 guri oo ka kooban 1 ilaa 4 qol jiif
- Guryaha dabaqa hoose waxay leeyihiin marin iyo meel bannaan oo u gaar ah.
- Mid ka mid ah dhismayaasha waxaa ku jiri doona xafiiska maamulka.
- Dhismayaashu waxay yeelan doonaan goobo adeegyo gudaha ah
- baarkinku wuxuu ahaan doonaa garaashyo dhulka hoostiisa ah



* Sawirrada la soo bandhigay waa tusaale keliya.
Naqshadda dhismayaashu way is beddeli kartaa inta
mashruucu socdo.

Shuruudaha Qiimeynta

SHURUUDAHA	FAAHFAAHINTA	MA BUUXIYAA?
Mudnaanta Deganayaasha		
Xaaladda iyo tayada guryaha	Horumarinta dibadda iyo goobta, cusboonaysiinta gudaha (dabaqyada, dhammeystirka, qalabka), iyo nidaamyada la cusboonaysiiyey: kuleylinta, qaboojinta, iyo hawo-wareejinta	Haa
Ku-habboonaanta & shaqeynta guriga	Heerarka guryaha cusub ee MN Housing oo la awoodi karo: cabbirka jikada, qolka cuntada, qolka fadhiga, tirada musqulaha, baarkin iyo kaydin dheeraad ah	Haa
Astaanta bulshada iyo isku xirnaanta	Albaabbada hore, meelaha cagaaran ee wadaagga ah, barxadaha gaarka ah iyo adeegyada bulshada	Qayb ahaan
Helitaan (Accessibility)	Ikhtiyaarro nolol dabaq siman ah iyo guryo si fudud loo geli karo	Haa
Dib-u-dejin	Waxay suuragelin kartaa qaar ka mid ah dib-u-dejinta goobta gudaheeda iyadoo la yareynayo dib-u-dejinta bannaanka	Qayb ahaan
Mudnaanta Dheeraadka ah		
Guryo dheeraad ah	Ku darista guryo qiimo-jaban oo badan iyo noocyo kala duwan	Haa
Shuruudaha Maalgelinta		
Maalgelinta mashruuca	Awoodda lagu heli karo maalgelin	Haa
Shuruudaha maalgeliyaha	Heerarka helitaanka, heerarka guryeynta Minnesota, heerarka/shuruudaha HUD	Haa
Ilaalinta taariikhiga ah	Haddii goobtu u qalanto Diiwaanka Qaranka, waxay buuxin kartaa shuruudaha dayactirka taariikhiga ah	Maya

Faa'iidooyinka & Tixgelinnada

SHURUUDAHA	FAAHFAAHINTA
Mudnaanta Deganayaasha	
Xaaladda iyo tayada guryaha	Dhismaha cusub wuxuu bixiyaa fursadda ugu wanaagsan ee lagu dhisi karo guryo casri ah oo daboolaya baahiyaha ay deggeneyaashu muujiyeen, sida: Hagaajinta bannaanka iyo deegaanka, Dib-u-cusboonaysiinta gudaha guryaha, oo ay ku jiraan sagxadaha, dhammeystirka gudaha iyo qalabka, iyo Casriyeynta nidaamyada kuleylka, qaboojinta iyo hawo-wareegga. Dhismayaasha cusub waxay si weyn u yareyn doonaan isu gudbinta dhawaaqa guryaha. Dhammaan walxaha halista ah ee jira laga saari doono ama si ammaan ah loo xakamayn doono.
Ku-habboonaanta & shaqeynta guriga	Dhismaha cusub waa ikhtiyaarka ugu habboon ee lagu buuxin karo heerarka casriga ah ee guryaha. Waxa uu siinayaa fursad lagu helo: guryo dabaq keliya ah oo aan jaranjaro lahayn, noocyo kala duwan oo dhismayaal ah, jikooyin waaweyn, qolal fadhiga oo ballaaran, musqulo dheeraad ah, meelo kaydin oo badan, iyo baarkin dheeraad ah, oo ay ku jiraan baarkin daboolan. Waxaa meesha ka bixi doona meelihii kaydinta ee dhulka hoose (basement storage space).
Astaanta bulshada iyo isku xirnaanta	Dhismayaasha hadda jira waa la beddelayaa. Noocyada cusub ee dhismayaasha iyo meelaha bannaanka waxay abuuri karaan jawi bulsho oo ka duwan kii hore. Deggeneyaasha qaar ayaa walaac ka muujiyey dhismayaasha dabaqyada badan; guryaha qaarkood ma yeelan doonaan albaab toos uga furma bannaanka. Ikhtiyaarkan wuxuu bixiyaa fursadda ugu fiican ee lagu kordhin karo adeegyada bulshada iyo goobta.
Helitaan (Accessibility)	Dhismaha cusub wuxuu bixiyaa fursadda ugu wanaagsan ee lagu horumarin karo helitaanka dadka naafada ah, lagu abuuri karo guryo aan jaranjaro lahayn, waana fursada ugu fiican oo lagu dabooli karo baahiyaha caafimaad iyo badbaado ee ay deggeneyaashu muujiyeen.
Dib-u-dejin	Waa ikhtiyaarka ugu habboon ee lagu taageeri karo in qoysaska qaar ay goobta sii joogaan inta dhismuhu socdo. Deggeneyaashuna waxay xaq u leeyihiin inay dib ugu soo laabtaan Glendale marka mashruucu dhammaado.
Mudnaanta Dheeraadka ah	
Guryo dheeraad ah	Ikhtiyaarkan wuxuu abuuri karaa qiyaastii 100 guri oo cusub oo qiimo-jaban iyo noocyo kala duwan, taasoo MPHA u sahlaya inay si wanaagsan ugu adeegto qoysaska Glendale iyo kuwa ku jira liiska sugitaanka. MPHA waxay hadda leedahay ku dhawaad 3,500 qoys oo sugaya guryo, halka Minnesota ay weli u baahan tahay 97,500 guri oo dheeraad oo ay awoodi karaan qoysaska dakhligoodu aad u hooseeyo.
Shuruudaha Maalgelinta	
Maalgelinta mashruuca	Habkan wuxuu leeyahay kharashka ugu hooseeya halkii guri, iyadoo maalgelintu ku xirnaan karto ilaha deegaanka iyo deeqaha kale.
Shuruudaha maalgeliyaha	Ikhtiyaarkan ayaa si fiican u buuxin kara shuruudaha helitaanka dadka naafada ah, heerarka MN Housing, iyo heerarka iyo shuruudaha HUD.
Ilaalinta taariikhiga ah	Ikhtiyaarkan ma ilaalinayo dhismayaasha taariikhiga ah ee hadda jira, maadaama dhismayaal cusub la dhisi doono beddelkooda.

Qalabka HUD & Guryaha La Awoodi Karo

- **Barnaamijka Isku-dhafka ah ee HUD's RAD Section 18**
 - Kaalmada kirada waxay ka wareegaysaa Public Housing (Section 9) una wareegeysaa Project-Based Voucher (Section 8)
 - Kaalmadu waxay ku xirnaan doontaa guriga ugu yaraan 40 sano
 - Xuquuqda iyo ilaalinta dadka deggan waxba iskama beddelayaan
 - Waxay suuragelinaysaa in la isticmaalo ilo maalgelin oo caadi ahaan loo adeegsado guryaha la awoodi karo, sida: Deymaha Canshuurta Guryaha Dadka Dakhligoodu Hooseeyo, maalgalino caadi ah, iyo maalgelinta taageerada ee dowlad-goboleedka iyo maamulka deegaanka
- **Sababta Loo Adeegsanayo Barnaamijka Isku-dhafta RAD Section 18**
 - Waxay kordhisaa maalgelinta sanadlaha ah ee HUD si loo taageero dayactir iyo horumarin badan oo lagu sameeyo guryaha, maadaama qoondada Section 8 ay inta badan ka sarreyso kana xasiloon tahay tan Section 9
 - Barnaamijka Guryaha Dadweynaha (Section 9) wuxuu xaddidayaa maalgelinta, taasoo caqabad ku ah wax ka qabashada dayactirka dib u dhacay ee \$290 milyan iyo hagaajinta tayada guryaha.
 - Waxay suuragelinaysaa isticmaalka Deymaha Canshuurta Guryaha Dadka Dakhligoodu Hooseeyo (LIHTC), oo ah isha ugu weyn ee maalgelinta guryaha la awoodi karo ee dalka oo dhan
 - Waxay suuragelinaysaa helitaanka maalgelinta taageerada ee heer deegaan, gobol, iyo federaal.
- **Waxa uu Suurtagelinayo Barnaamijka Isku-dhafta RAD Section 18**
 - Maalgashi ballaaran oo wax ku ool ah oo kor u qaadaya: tayada nololaha, helitaanka ama adeegyada dada naafada ah, iyo tayada guud guryaha si loo daboolo baahiyaha casriga ah ee dada deggan Glendale.

La'aanta ilahan maalgalinta cusub, Glendale wuxuu ahaanayaa sida uu hada yahay – guryo gabow ah, si buuxda loo heli Karin, isla markaana aan dabooleynin baahida maanta

Balanqaadyada MPHA Isma Beddelayaan

- MPHA waxay Leedahay Dhulka
 - Lahaanshaha marna ma wareegayo. Heshiiska kirada dhulku waa 99 sano, iyadoo MPHA ay tahay milkiilaha dhulka.
- MPHA Waxay Maamushaa Mashruuca
 - MPHA ayaa sii ahaanaysa maamulka iyo hawl-wadeenka Mashruuca. Maalgashadayaashu ma maamulayaan mashruuca.
- MPHA ayaa Maamuleysa Hantida
 - MPHA waxay sii wadeeysaa maamulka iyo howgelinta hantida
- Xaddidaadaha Kirada La Awoodi Karo
 - Xaddidaado sharci oo ku xiran dhulka, kana madax-bannaan qoondaynta Kongareeska iyo isbeddellada maalgelinta.
- Deggennayaasha waxeey bixinayaan 30% dahligooda, sida hada.
 - Qoys kasta wuxuu leeyahay Project-Based Voucher oo ku xiran heshiis HUD ah oo 20 sano ah, si toos ahna loo cusboonaysiinayo 20 sano oo kale – taasoo ah dammaanad federaal oo muddo dheer ah oo aanu bixin Barnaamijka Section 9 Public Housing
 - Dadka deggan waxay bixiyaan 30% dakhligooda, iyadoo xaddidaadaha dhulku ay xaqiijiyaan ilaalin dheeraad ah
- Dib-u-dejin & Xuquuqda Soo Noqoshada
 - MPHA waxay leedahay khibrad la xaqiijiyay oo ay si qof-qof ah ula shaqeyso dadka deggan, iyadoo mudnaanta siinaysa dib-u-dejin gudaha Glendale inta ugu badan ee suurtagalka ah.
 - HUD iyo maalgeliyeyaasha kale waxay dalbanayaan qorshe dib-u-dejin oo rasmi ah ka hor hirgelinta mashruuca.
 - Qoys kasta oo hadda deggan wuxuu xaq u leeyahay inuu ku soo laabto guri ku habboon baahiyaha qoyskiisa, sida uu dhigayo barnaamijka RAD ee HUD.

Dib-u-dejin

- Dib-u-dejin ayaa loo baahan doonaa, iyadoon loo eegin nooca mashruuca la doorto.
- MPHA waxay qorshaynaysaa inay qoysaska ugu badan ku sii hayso Glendale iyadoo la keydinayo guryaha bannaan marka qoysas kale guuraan.
- MPHA ayaa bixin doonta dhammaan kharashaadka guuritaanka.
- Waxaan ognahay in qoysas qaar ay khasab ku noqon doonto inay si ku-meel-gaar ah uga guuraan Glendale inta dhismuhu socdo.
- Qoys kasta oo ku qasbanaada ama ikhtiyaar uga guura inta dhismuhu socdo wuxuu xaq u leeyahay inuu dib ugu soo laabto.
- Qofna ma lumin doono kaalmada guriyeynta sababo la xiriira dib-u-dejin.

- Kulamada Qof-Qofka ah
 - Dhammaadka Luulyo waxaa bilaaban doona kulamo qof-qof ah si loo fahmo baahiyahaaga. Hassan, Isuduwaha Dib-u-dejinta ee MPHA, ayaa gurigaaga kugula kulmi doona si uu u ogaado baahiyahaaga iyo doorbidyadaad.

- Heshiiska Dib-u-dejinta
 - Kulamada kooxaha yar-yar waxaa lagu sharxi doonaa xuquuqda dadka deggan iyo dammaanadaha la bixiyo.
 - MPHA waxay bisha Agoosto la bilaabi doontaa dadka deggan diyaarinta heshiiska dib-u-dejinta.

MPHA Waa Isha Taageerada

- Waxaan ognahay inaad su'aalo badan yeelan doontaan inta mashruucani socdo.
- MPHA waxay diyaar u tahay inay ka jawaabto su'aalihiinna.
- Waxaad la xiriiri kartaan Maamulaha Hantida, Kayse Kruschke, oo idin ka caawin doonta helitaanka jawaabaha.
- Kooxda mashruuca ayaa sidoo kale qaban doonta saacado xafiis oo dheeraad ah mustaqbalka.

Tallabooyinka Xiga

- Shaqo badan oo naqshadeyn iyo qorsheyn ah ayaa weli harsan. Waxaan sii wadi doonaa wadatashi, qorsheyn iyo go'aan wadajir ah.
- Kooxda La-talinta Dadka Degaanka & Booqashooyinka Guryaha / Saacadaha Xafiiska
 - Haddii aad xiisaynayso inaad ka qayb gasho Kooxda La-talinta Dadka Degaanka ama booqashooyin dheeraad ah oo ay MPHA iyo kooxda naqshadeyntu kuugu yimaadaan gurigaaga, fadlan la socodsii Kayse. MPHA waxay sidoo kale qaban doontaa saacadaha xafiiska mar kale, waxaana la soo saari doonaa ogeysiisyo ku saabsan jadwalkooda!

- Juun 18, 2026
 - Kulanka wadatashiga Section 106, halkaas oo MPHA ay ku soo bandhigi doonto agabka kulankan.
- Luulyo 2026
 - MPHA waxay bilaabeysaa raadinta maalgelinta mashruuca.
 - Taageerada MN Housing iyo Magaalada
 - Waxaa sidoo kale la tixgelinayaa fursado kale oo maalgelin ah sannadka soo socda.
- Dhammaadka Luulyo 2026
 - kulamada qof-qofka ah ee dadka deggan ayaa bilaaban.
- Agoosto 2026
 - Waxaa bilaaban doona wada-hadallada Heshiiska Dib-u-dejinta iyadoo lala kaashanayo Kooxda La-talinta Dadka Degaanka iyo Kulamada Furan
- Sebteembar 2026 – Xagaaga 2027
 - aqshadeyn, qorsheyn, iyo la-tashi dheeraad ah oo lala yeesho dadka deggan.
 - Wadahadallo dheeraad ah oo ku saabsan Heshiiska Dib-u-dejinta.
 - Wacyigelin iyo la-tashi dheeraad ah oo ku saabsan Barnaamijka HUD RAD Section 18 Blend.

Fadhiyada Kooxaha

- Afar mowduuc ayaa diyaar idiin ah si aad uga dooddaan si qoto dheer, u waydiisaan su'aalo, una dhiibtaan fikradihiinna.
- Miis kasta wuxuu leeyahay mowduuc u gaar ah. Waxaad u wareegi kartaan miis kasta sida aad doontaan, kana qayb geli kartaan wakhti kasta.

Miiska 1: Qorshaha Goobta iyo Adeegyada

- Wax badan ka baro noocyada kala duwan ee dhismayaasha, goobahooda, iyo qorshayaasha bilowga ah ee naqshadeynta.
- Ka dood adeegyada iyo goobaha wadaagga ah ee mashruuca.

Miiska 2: Naqshadda iyo Qaabka Guryaha

- Baro sida guryaha cusub iyo kuwa hadda jira ay isugu barbar dhigmaan marka la eego cabbirka, kaydinta, iyo qaab-dhismeedka.

Miiska 3: Dib-u-dejin

- Baro Heshiiska Dib-u-dejinta ee MPHA ay la diyaarisay dadka deggan mashruuc kale..
- Wax badan ka ogow waxa uu ka kooban yahay qorshaha dib-u-dejintu.

Miiska 4: HUD iyo Qalabka Guryaha La Awoodi Karo

- Baro sida MPHA u isticmaasho Barnaamijka HUD RAD Section 18 Blend.
- Wax badan ka ogow isticmaalka Low-Income Housing Tax Credits iyo ilaha kale ee maalgelinta guryaha la awoodi karo.

DAYACTIR + BALLAADHIN



SHURUUDAHA QIIMEYNTA

SHURUUDAHA	FAAHFAAHINTA	MA BUUXIYAA?
Mudnaanta Deganayaasha		
Xaaladda iyo tayada guryaha	Horumarinta dibadda iyo goobta, cusboonaysiinta gudaha (dabaqyada, dhammeystirka, qalabka), iyo nidaamyada la cusboonaysiiyey: kuleylinta, qaboojinta, iyo hawo-wareejinta	Haa
Ku-habboonaanta & shaqeynta guriga	Heerarka guryaha cusub ee MN Housing oo la awoodi karo: cabbirka jikada, qolka cuntada, qolka fadhiga, tirada musqulaha, baarkin iyo kaydin dheeraad ah	Qayb ahaan
Astaanta bulshada iyo isku xirnaanta	Albaabbada hore, meelaha cagaaran ee wadaagga ah, barxadaha gaarka ah iyo adeegyada bulshada	Qayb ahaan
Helitaan (Accessibility)	Ikhtiyaarro nolol dabaq siman ah iyo guryo si fudud loo geli karo	Maya
Dib-u-dejin	Waxay suuragelin kartaa qaar ka mid ah dib-u-dejinta goobta gudaheeda iyadoo la yareynayo dib-u-dejinta bannaanka	Qayb ahaan
Mudnaanta Dheeraadka ah		
Guryo dheeraad ah	Ku darista guryo qiimo-jaban oo badan iyo noocyo kala duwan	Maya
Shuruudaha Maalgelinta		
Maalgelinta mashruuca	Awoodda lagu heli karo maalgelin	Haa
Shuruudaha maalgeliyaha	Heerarka helitaanka, heerarka guryeynta Minnesota, heerarka/shuruudaha HUD	Qayb ahaan
Ilaalinta taariikhiga ah	Haddii goobtu u qalanto Diwaanka Qaranka, waxay buuxin kartaa shuruudaha dayactirka taariikhiga ah	Haa

FAA'IIDOOYINKA IYO CAQABADAHA

SHURUUDAHA	FAAHFAAHINTA
Mudnaanta Deganayaasha	
Xaaladda iyo tayada guryaha	Hagaajinta bannaanka waxay raaci doontaa xeerarka ilaalinta dhismayaasha taariikhiga ah, kuwaas oo saameynaya qalabka la isticmaalayo iyo isbeddellada bannaanka. Gudaha iyo nidaamyada dhismayaasha waa la casriyeynayaa, balse dhismayaasha 75-sano-jirka ah way sii jiri doonaan, taasoo kordhin karta kharashka dayactirka mustaqbalka. Gudbinta qaylada waa la yareyn karaa, laakiin gebi ahaanba lama baabi'in karo, halka walxaha halista ahna la saari doono ama la xakameyn doono.
Ku-habboonaanta & shaqeynta guriga	Qolalka fadhiga isma beddeli doonaan; tirada iyo cabbirka musqulaha guryaha qaarkood (gaar ahaan kuwa leh 4 qol) ma gaari doonaan heerarka guryaha cusub; baarkin cusub lama kordhin doono; meelaha kaydinta ee dabaqyada sare waa xaddidan yihiin; dhulka hoose (basement) iyo jaranjarooyinka way sii jiri doonaan; inta badan qolalka jifku waxay ahaan doonaan cabbirkoodii hore.
Astaanta bulshada iyo isku xirnaanta	Barxadaha gaarka ah ee dambe (backyards) ayaa qiyaastii 50% yaraandoona si loogu sameeyo ballaarinta iyadoo la ilaalinayo shuruudaha dhismayaasha taariikhiga ah; adeegyo cusub oo bulshada ama goobta ah laguma dari doono.
Helitaan (Accessibility)	Horumarinta helitaanka dadka naafada ah waa mid kooban; buuxinta shuruudaha HUD waxay kordhin kartaa kharashka, halka jaranjarooyinka iyo caqabadaha helitaankuna ay sii jiri doonaan. Guryo dabaq siman ahna lama heli doono.
Dib-u-dejin	Madaama aan guryo cusub la dhiseeynin, waxaa laga yaabaa inay adkaato in qoysaska qaar lagu sii hayo goobta inta dhismuhu socdo. Deggenayaashu waxay sii haysanayaan xuquuqooda ay dib ugu soo laaban karaan Glendale marka mashruucu dhammaado.
Mudnaanta Dheeraadka ah	
Guryo dheeraad ah	Lama dhisi doono guryo cusub oo la awoodi karo ama guryo waaweyn iyo hal qol jif leh, taasoo xaddidaysa awoodda MPHA ee ay ugu adeegto qoysaska Glendale iyo kordhinta guryaha la awoodi karo ee xaafadda.
Shuruudaha Maalgelinta	
Maalgelinta mashruuca	Helitaanka Historic Tax Credits (HTCs) waxay ku xirnaan doontaa in goobtu u qalanto ilaalinta taariikhiga ah. Habkan ayaa leh kharashka ugu sarreeya ee horumarinta halkii guri, taas oo yarayn karta ilaha loo heli karo hagaajinta kale iyo adeegyada bulshada.
Shuruudaha maalgeliyaha	Habkani ma buuxin doono shuruudaha helitaanka dadka naafada ah, heerarka MN Housing, iyo heerarka iyo shuruudaha HUD.
Ilaalinta taariikhiga ah	Wuu buuxiyaa shuruudaha ilaalinta taariikhiga ah

DAYACTIR + BALLAARIN + DHISMO CUSUB



SHURUUDAHA QIIMEYNTA

SHURUUDAHA	FAAHFAAHINTA	MA BUUXIYAA?
Mudnaanta Deganayaasha		
Xaaladda iyo tayada guryaha	Horumarinta dibadda iyo goobta, cusboonaysiinta gudaha (dabaqyada, dhammeystirka, qalabka), iyo nidaamyada la cusboonaysiiyey: kuleylinta, qaboojinta, iyo hawo-wareejinta	Haa
Ku-habboonaanta & shaqeynta guriga	Heerarka guryaha cusub ee MN Housing oo la awoodi karo: cabbirka jikada, qolka cuntada, qolka fadhiga, tirada musqulaha, baarkin iyo kaydinta dheeraad ah	Qayb ahaan
Astaanta bulshada iyo isku xirnaanta	Albaabbada hore, meelaha cagaaran ee wadaagga ah, barxadaha gaarka ah iyo adeegyada bulshada	Qayb ahaan
Helitaan (Accessibility)	Ikhtiyaarro nolol dabaq siman ah iyo guryo si fudud loo geli karo	Qayb ahaan
Dib-u-dejin	Waxay suuragelin kartaa qaar ka mid ah dib-u-dejinta goobta gudaheeda iyadoo la yareynayo dib-u-dejinta bannaanka	Qayb ahaan
Mudnaanta Dheeraadka ah		
Guryo dheeraad ah	Ku darista guryo qiimo-jaban oo badan iyo noocyo kala duwan	Qayb ahaan
Shuruudaha Maalgelinta		
Maalgelinta mashruuca	Awoodda lagu heli karo maalgelin	Haa
Shuruudaha maalgeliyaha	Heerarka helitaanka, heerarka guryeynta Minnesota, heerarka/shuruudaha HUD	Qayb ahaan
Ilaalinta taariikhiga ah	Haddii goobtu u qalanto Diwaanka Qaranka, waxay buuxin kartaa shuruudaha dayactirka taariikhiga ah	?

FAA'IIDOOYINKA IYO CAQABADAHA

SHURUUDAHA	FAAHFAAHINTA
Mudnaanta Deganayaasha	
Xaaladda iyo tayada guryaha	Guryaha hadda jira: Waxay la mid yihiin ikhtiyaarka Dayactir iyo Ballaarin Guryaha Cusub: Dhismo cusub oo dabaqyo badan iyo wiishba leh ayaa siin kara guryo casri ah oo la jaanqaadaya baahiyaha maanta
Ku-habboonaanta & shaqeynta guriga	Guryaha hadda jira: Waxay la mid yihiin ikhtiyaarka Dayactir iyo Ballaarin. Guryaha Cusub: Waxaa loo naqshadeyn doonaa inay buuxiyaan heerarka MN Housing ee guryaha cusub; waxaa ku jiri kara baarkin dhulka hoostiisa ah iyo baarkin cusub oo bannaanka ah.
Astaanta bulshada iyo isku xirnaanta	Guryaha hadda jira: Waxay la mid yihiin ikhtiyaarka Dayactir iyo Ballaarin. Guryaha Cusub: Noocyada kala duwan ee dhismayaasha iyo meelaha bannaanka ayaa abuuri kara dareen bulsho oo ka duwan kii hore; qaar ka mid ah deggenyaasha ayaa walaac ka muujijey dhismayaasha dabaqyada badan iyo kuwa leh wiishash; adeegyada cusub ee bulshada iyo goobta ayaa weli noqon kara kuwo xaddidan.
Helitaan (Accessibility)	Guryaha hadda jira: Waxay la mid yihiin ikhtiyaarka Dayactir iyo Ballaarin. Guryaha Cusub: Waxaa loo dhisi doonaa si ay u buuxiyaan shuruudaha helitaanka dadka naafada ah, taasoo fududaynaysa isticmaalka dhammaan dadka.
Dib-u-dejin	Ikhtiyaarkan wuu ka wanaagsan yahay Dayactir iyo Ballaarin oo keliya, sababtoo ah wuxuu kordhinayaa fursadaha ay qoysaska qaar ugu sii nagaan karaan Glendale inta dhismuhu socdo, iyadoo ku xiran tirada guryaha cusub ee la dhiso. Deggenyaashu waxay sii haysanayaan xaqa ay ugu soo laaban karaan Glendale marka mashruucu dhammaado.
Mudnaanta Dheeraadka ah	
Guryo dheeraad ah	Tirada guryaha cusub ee la awoodi karo iyo noocyada kala duwan ee guryaha ayaa laga yaabaa inay koobaadaan. Tani waxay yarayn kartaa awoodda MPA ee ay ugu adeegto qoysas badan oo Glendale deggan iyo inay bixiso guryo dheeraad ah oo qiimo-jaban oo ku yaalla xaafad leh adeegyo badan, gaadiid dadweyne oo wanaagsan, iyo fursado dhaqaale oo badan.
Shuruudaha Maalgelinta	
Maalgelinta mashruuca	Helitaanka HTC's waxay ku xirnaan doontaa in goobtu u qalanto ilaalinta taariikhiga ah; tirada guryaha cusubna waxaa laga yaabaa in la yareeyo si loo waafajiyo maalgelinta la heli karo.
Shuruudaha maalgeliyaha	Guryaha hadda jira: Waxay la mid yihiin ikhtiyaarka Dayactir iyo Ballaarin.
Ilaalinta taariikhiga ah	Waxaa laga yaabaa in la buuxiyo shuruudaha, iyadoo ku xiran inta ay le'eg yihiin dhismayaasha cusub ee lagu darayo goobta.

DHISMO CUSUB



SHURUUDAHA QIIMEYNTA

SHURUUDAHA	FAAHFAAHINTA	MA BUUXIYAA?
Mudnaanta Deganayaasha		
Xaaladda iyo tayada guryaha	Horumarinta dibadda iyo goobta, cusboonaysiinta gudaha (dabaqyada, dhammeystirka, qalabka), iyo nidaamyada la cusboonaysiiyey: kuleylinta, qaboojinta, iyo hawo-wareejinta	Haa
Ku-habboonaanta & shaqeynta guriga	Heerarka guryaha cusub ee MN Housing oo la awoodi karo: cabbirka jikada, qolka cuntada, qolka fadhiga, tirada musqulaha, baarkin iyo kaydinta dheeraad ah	Haa
Astaanta bulshada iyo isku xirnaanta	Albaabbada hore, meelaha cagaaran ee wadaagga ah, barxadaha gaarka ah iyo adeegyada bulshada	Qayb ahaan
Helitaan (Accessibility)	Ikhtiyaarro nolol dabaq siman ah iyo guryo si fudud loo geli karo	Haa
Dib-u-dejin	Waxay suuragelin kartaa qaar ka mid ah dib-u-dejinta goobta gudaheeda iyadoo la yareynayo dib-u-dejinta bannaanka	Qayb ahaan
Mudnaanta Dheeraadka ah		
Guryo dheeraad ah	Ku darista guryo qiimo-jaban oo badan iyo noocyo kala duwan	Haa
Shuruudaha Maalgelinta		
Maalgelinta mashruuca	Awoodda lagu heli karo maalgelin	Haa
Shuruudaha maalgeliyaha	Heerarka helitaanka, heerarka guryeynta Minnesota, heerarka/shuruudaha HUD	Haa
Ilaalinta taariikhiga ah	Haddii goobtu u qalanto Diwaanka Qaranka, waxay buuxin kartaa shuruudaha dayactirka taariikhiga ah	Maya

FAA'IIDOOYINKA IYO CAQABADAHA

SHURUUDAHA	FAAHFAAHINTA
Mudnaanta Deganayaasha	
Xaaladda iyo tayada guryaha	Dhismaha cusub wuxuu bixiyaa fursadda ugu wanaagsan ee lagu dhisi karo guryo casri ah oo daboolaya baahiyaha ay deggeneyaashu muujiyeen, sida: Hagaajinta bannaanka iyo deegaanka, Dib-u-cusboonaysiinta gudaha guryaha, oo ay ku jiraan sagxadaha, dhammeystirka gudaha iyo qalabka, iyo Casriyeynta nidaamyada kuleylka, qaboojinta iyo hawo-wareegga. Dhismayaasha cusub waxay si weyn u yareyn doonaan isu gudbinta dhawaaq guryaha. Dhammaan walxaha halista ah ee jira laga saari doono ama si ammaan ah loo xakamayn doono.
Ku-habboonaanta & shaqeynta guriga	Dhismaha cusub waa ikhtiyaarka ugu haboon ee lagu buuxin karo heerarka casriga ah ee guryaha. Waxa uu siinayaa fursad lagu helo: guryo dabaq keliya ah oo aan jaranjaro lahayn, noocyo kala duwan oo dhismayaal ah, jikoyin waaweyn, qolal fadhiga oo ballaaran, musqulo dheeraad ah, meelo kaydinta badan, iyo baarkin dheeraad ah, oo ay ku jiraan baarkin daboolan. Waxaa meesha ka bixi doona meelihii kaydinta ee dhulka hoose (basement storage space).
Astaanta bulshada iyo isku xirnaanta	Dhismayaasha hadda jira waa la beddelayaa. Noocyada cusub ee dhismayaasha iyo meelaha bannaanka waxay abuuri karaan jawi bulsho oo ka duwan kii hore. Deggeneyaasha qaar ayaa walaac ka muujiyey dhismayaasha dabaqyada badan; guryaha qaarkood ma yeelan doonaan albaab toos uga furma bannaanka. Ikhtiyaarkan wuxuu bixiyaa fursadda ugu fiican ee lagu kordhin karo adeegyada bulshada iyo goobta.
Helitaan (Accessibility)	Dhismaha cusub wuxuu bixiyaa fursadda ugu wanaagsan ee lagu horumarin karo helitaanka dadka naafada ah, lagu abuuri karo guryo aan jaranjaro lahayn, waana fursada ugu fiican oo lagu dabooli karo baahiyaha caafimaad iyo badbaado ee ay deggeneyaashu muujiyeen.
Dib-u-dejin	Waa ikhtiyaarka ugu haboon ee lagu taageeri karo in qoysaska qaar ay goobta sii joogaan inta dhismuhu socdo. Deggeneyaashuna waxay xaq u leeyihiin inay dib ugu soo laabtaan Glendale marka mashruucu dhammaado
Mudnaanta Dheeraadka ah	
Guryo dheeraad ah	Ikhtiyaarkan wuxuu abuuri karaa qiyaastii 100 guri oo cusub oo qiimo-jaban iyo noocyo kala duwan, taasoo MPHA u sahlaya inay si wanaagsan ugu adeegto qoysaska Glendale iyo kuwa ku jira liiska sugitaanka. MPHA waxay hadda leedahay ku dhawaad 3,500 qoys oo sugaya guryo, halka Minnesota ay weli u baahan tahay 97,500 guri oo dheeraad oo ay awoodi karaan qoysaska dakhligoodu aad u hooseeyo.
Shuruudaha Maalgelinta	
Maalgelinta mashruuca	Habkan wuxuu leeyahay kharashka ugu hooseeya halkii guri, iyadoo maalgelintu ku xirnaan karto ilaha deegaanka iyo deeqaha kale.
Shuruudaha maalgeliyaha	Ikhtiyaarkan ayaa si fiican u buuxin kara shuruudaha helitaanka dadka naafada ah, heerarka MN Housing, iyo heerarka iyo shuruudaha HUD.
Ilaalinta taariikhiga ah	Ikhtiyaarkan ma ilaalinayo dhismayaasha taariikhiga ah ee hadda jira, maadaama dhismayaal cusub la dhisi doono beddelkooda.